

XAFIISKA LATALIYAHA GUUD
Waaxda Hawlgallada Maaraynta

QORAALKA OM 22-09

Maajo 2, 2022

- Kusocota:** Dhammaan Agaasimayaal Goboleedyada,
Saraakiisha iyo Saraakiisha Deegaanka
- Kasocota:** Joan A. Sullivan, Ku xigeenka La taliyaha Guud
- Mowduuca:** Hubinta Nabadgalyada iyo Helitaan Sharafta leh ee Shaqaalaha Soo galootiga ee Hannaanka NLRB

Si loo xaqiijiyo in si wax ku ool ah u baari karno oo aan u xallin karno xadgudubyada Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka, La taliyaha Guud, isagoo tiigsanaya [GC 22-01, Xaqiijinta Xuquuqaha iyo Xalalka Shaqaalaha Soo galootiga Hoos yimaada NLRA](#), oo ay dhidibada u taagtay dhowr hindise cusub oo looga dan leeyahay in lagu fududeeyo si badqabta oo sharaf leh islamarkaana lagu heli karo hannaanka NLRB ee shaqaalaha soo galootiga ah.

Mid kamid ah dadaalladaas ayaa ahaa abuurista xaanshida xaqiiqda ah si loo siiyo macluumaadka marqaatiyada la xiriira xaaladda socdaalka iyo hannaanka baaritaanka NLRB. Xaanshidaas xaqiiqda ah waxay ku lifaaqantahay halkan, Af Ingiriisi iyo Af Isbaanish, waxaana sidoo kale laga heli karaa shabakadeenna iyadoo Af Ingiriisi ah www.nlr.gov/news-publications/publications/brochures iyo Af Spanish www.nlr.gov/es/news-publications/publications/brochures. Xaanshida xaqiiqada ah waxay sharxaysaa in heerka socdaalku uusan khusayn haddii ay jirto xadgudub NLRA ah, in macluumaadka la helay intii lagu jiray baaritaanada NLRB la ilaalinayo, iyo in cid dacwad ku soo oogaysay mise markhaati uu NLRB waydiisan karo gargaarka socdaalka shaqaalaha goobta shaqada. haddii ay lagama maarmaan tahay in la ilaaliyo shaqaalaha ka qaybqaadanaya hannaanka NLRB mise isticmaalaya xuquuqahooda hoos yimaada NLRA. Xaanshida xaqiiqda ah waxa diyaariyey Kooxdayada Socdaalka, oo ay ku jiraan Isku-duwaha Socdaalka ee Gobollada 1, 4, 5, 16, iyo 31.

Wakiilada guddiga waa inay u qeybiyaan xaanshida xaqiiqda dhammaan markhaatiyaasha kahor intaysan markhaati furin. Intaa waxaa dheer, Saraakiisha Warfaafinta ee ka caawiya dadka soo booqda mise soo wacaya inay u diyaariyaan kharashka qofka si uu u ogaado oo u xareeyo waa inay keenaan nuqul xaanshida xaqiiqda ah oo ay la socoto qoraalka qabyada ah. Xusuusin ahaan, sida waafaqsan GC 22-01, wakiilada guddiga waa inay sidoo kale af ahaan ula taliyaan markhaatiga kahor intaysan ku markhaati furin dhaarta in socdaalka shakhsiga mise heerka ogolaanshaha shaqada uusan khusayn baaritaankeenna in NLRA lagu xadgudbay iyo in kale, mana waydiin doono socdaalka shakhsiga mise heerka ogolaanshaha shaqada.

Haddii weydiimo soo baxaan, mise aad ka ogtahay habdhaqanka dhinaca ee la xiriira socdaalka shaqaalaha mise heerka ogolaanshaha shaqada ee khatar galinaya waxtarka baarista, dacwadaha, mise awoodahayaga hagaajinta, fadlan si dagdag ah ula xiriir Iskuduwaha Socdaalka ee Gobolkaaga, kaasoo la shaqayn doona xubnaha Kooxda Socdaalka ee Waaxda Hawlgallada Maamulka si ay u caawiyaan.

/s/
J.A.S.

cc: NLRBU
Loo sii daaayay dadweynaha



Macluumaad Muhiim ah oo kusaabsan Baaritaannada NLRB ee Shaqaalaha Soo galootiga



Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka (NLRA) ayaa badanaa ilaaliya shaqaalaha ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyadoon loo eegayn xaaladdooda socdaal. NLRA waxay siisaa shaqaalaha xuquuqda ah:

- Sameynta, ku biiridda, mise caawinta urur si ay uga wada xaajoodaan mushaharka iyo xaaladaha kale ee shaqada.
- Kala hadlidda mushaharka iyo xaaladaha kale ee shaqada saaxiibada shaqada, ururka, xarunta shaqaalaha, wakaalada dawladda, warbaahinta, mise dadweynaha.
- La qaadasha tallaabo wadajir ah saaxiibada shaqo si aad isugu daydaan inaad hagaajisaan mushaharka iyo xaaladaha kale ee shaqada.
- Doorashada inaad ka qaybqaadan mid kamid ah tallaabooyinkan.

Hoos waxaa ku yaal macluumaad muhiim ah oo aad ka ogaan karto hannaankeenna baaritaanka qarsoodiga ah:

- Maxaa yeelay xaalada socdaalku kuma xirna haddii uu jiro xadgudub NLRA ah:
 - **Kuma** weydiin doon-no xaaladaada socdaalka.
 - **Uma** baahnid inaad nala wadaagto wax macluumaad ah oo kusaabsan xaaladaada socdaalka.
 - **Uma** baahnid inaad la wadaagto macluumaadka kusaabsan xaaladda saaxiibadaadii shaqo ee hadda/hore.
- Waxa kaliya oo aan dhaqan galinaa NLRA oo **Ma** jirto ku lug lahaansho ku aaddan fulinta sharciyada socdaalka.
- La **MA** wadaageyno wax macluumaad ah oo kugu saabsan Waaxda Amniga Gudaha (DHS), oo ay ku jiraan Laanta Socdaalka iyo Dhaqangalinta Ilaalada (ICE), mise hay'adaha kale ee socdaalka, ilaa aad codsato in aan la wadaagno macluumaadkaaga si aan kaaga caawino raadinta gargaarka socdaalka, sida lagu sifeeyay barta ugu dambaysa ee dukumeentiga.
- Haddii aad wax walwal ah ka qabtid imaanshaha xafiisyadeenna sabab kastaba, fadlan kala hadal Wakiilka Guddida ee kiiska loo xilsaaray wadiiqooyinka kale ee ka qaybgalka baaritaanka, oo ay ku jiraan qaadashada dhaartaada meel ka baxsan xafiiskeenna mise muuqaal ahaan.
- Baaritaannadeenna waa qarsoodi, taas oo micnaheedu tahay in **AAN** loo shiigi doonin dhaartaada shaqo bixiyaha, ilaa aad ka markaati furto maxkamad, mise aan raadinno amar maxkamad fadaraal ah.
- Haddii aadan ku qanacsanayn inaad nagula hadasho Af Ingiriisi, waxaan samayn doon-naa turjubaan diyaar u ah inuu ku siiyo caawimo iyo macluumaadka luqadda aad doorbidayso.
- Haddii aad ka warqabto in shaqo bixiye mise urur uu ku kacay mid kamid ah habdhaqanka soo socda, fadlan u sheeg wakiilka guddiga sababtoo ah waxay jabin kartaa sharciga:
 - Ku cagajugleynta in la waco DHS mise ICE mise cagajugleyn kale oo taas lamid ah sababtoo ah adiga mise shaqaalaha kale inaad faraha kula jirteen hawlo urur mise fal wadareed kale si loo hagaajiyo xaaladaha shaqada.
 - Weydiinta shaqaalaha inay bixiyaan dukumeentiyo/warqado socdaal oo cusub mise la cusboonaysiiyay mise dibu xaqiijinta ogolaanshaha shaqada shaqaalaha iyadoo aysan jirin sabab sax ah, aan takoor lahayn, taasoo ku xadgudbi karta NLRA mise sharcio kale.
- Haddii, dhamaadka baarista, aan go'aaminno inay jirto wanaagii lagu soo oogay (shaqo bixiyaha mise ururka waxay ku xadgudbeen sharciga) oo ay tahay inaan ka dacwayno kiiska hortiiisa Garsooraha Sharciga Maamulka, waxaan samayn doon-naa dadaal kasta si aan uga hortagno shaqo bixiyaha mise ururka shaqaalaha inay ku weydiiyaan xaaladdaada socdaalka.
- Haddii aad dacwad gudbisay mise aad markaati tahay oo adiga mise wakiilkaaga ay noo sheegaan inay jiraan hawlo la ilaaliyay oo NLRA ah oo ka jira goobta shaqada iyo gargaarka socdaalka waa lagama maarmaan si loo ilaaliyo shaqaalaha xuquuqahaas isticmaalaya mise ka qaybqaadanaya hannaanka NLRB, NLRB ayaa tixgalin doonta raadinta gargaarka socdaalka ee shaqaalaha goobtaas shaqada oo ay ku jiraan tallaabada dib loo dhigay, sii daynta, heerka U mise T Visa, mise gargaar kale sida la heli karo oo ku habboon. NLRB ma bixin karto talo socdaal. Haddii aad u baahantahay la taliye socdaal, liiska bixiyeyaasha adeegyada sharciga ee bilaashka ah ayaa laga heli karaa halkan: <https://www.justice.gov/eoir/list-pro-bono-legal-service-providers>.

Wixii macluumaad intaa kabadan oo kusaabsan NLRB, fadlan booqo shabakadeenna, www.nlrb.gov.



Información Importante Acerca de las Investigaciones de la NLRB para los Trabajadores Inmigrantes



La Ley Nacional de Relaciones del Trabajo (NLRA por sus siglas en inglés) protege a la mayoría de los empleados del sector privado, independientemente de su estatus migratorio. La NLRA les da a los empleados el derecho a:

- Formar, afiliarse o ayudar a una unión para negociar sobre los salarios y otras condiciones de trabajo.
- Discutir los salarios y otras condiciones de trabajo con los compañeros de trabajo, una unión, un centro de trabajadores, una agencia gubernamental, los medios de comunicación o el público.
- Tomar acciones colectivas con los compañeros de trabajo para tratar de mejorar los salarios y otras condiciones de trabajo.
- Optar por no participar en ninguna de estas acciones.

A continuación, le presentamos información importante que debe conocer acerca de nuestro proceso de investigación confidencial:

- Porque el estatus migratorio no es pertinente si ha habido una violación de la NLRA:
 - Nosotros **NO** le preguntaremos sobre su estatus migratorio.
 - Usted **NO NECESITA** compartir ninguna información con nosotros acerca de su estatus migratorio.
 - Usted **NO NECESITA** compartir ninguna información sobre el estatus [migratorio] de sus actuales/antiguos compañeros de trabajo.
- Sólo hacemos cumplir la NLRA y **NO** estamos involucrados en el cumplimiento de las leyes de inmigración.
- **NO** compartimos ninguna información sobre usted con el Departamento de Seguridad Nacional (DHS por sus siglas en inglés), incluyendo el Servicio de Inmigración y Control de Aduanas (ICE por sus siglas en inglés) o cualquier otra autoridad de inmigración, a menos que usted solicite que compartamos su información para ayudarle a buscar alivio migratorio, como se describe en el último punto de este documento.
- Si tiene preocupaciones acerca de presentarse en nuestras oficinas por cualquier razón, por favor hable con el agente de la Junta asignado al caso sobre otras maneras de participar en la investigación, incluyendo tomar su declaración jurada fuera de nuestra oficina o por video.
- Nuestras investigaciones son confidenciales, lo que significa que **NO** divulgaremos su declaración jurada a un empleador, a menos que usted testifique en un juicio, o que busquemos un mandato judicial federal.
- Si no está cómodo/a comunicándose con nosotros en inglés, tendremos un intérprete disponible para proporcionarle asistencia e información en su idioma predilecto.
- Si usted sabe que un empleador o unión ha incurrido en alguna de las siguientes conductas, por favor infórmele al agente de la Junta ya que puede violar la ley:
 - Amenazar con llamar al DHS o al ICE o hacer otras amenazas similares porque usted u otros empleados han participado en actividades sindicales u otras acciones colectivas para mejorar las condiciones de trabajo.
 - Pedir a los empleados que proporcionen documentos/papeles de inmigración nuevos o actualizados o volver a verificar la autorización de trabajo de los empleados sin una razón válida y no discriminatoria, que podría violar la NLRA u otras leyes.
- Si, al final de la investigación, determinamos que el cargo tiene mérito (el empleador o la unión han violado la ley) y tenemos que litigar el caso frente a un Juez de Ley Administrativa, haremos todo lo posible para evitar que el empleador o la unión le pregunten sobre su estatus migratorio.
- Si usted ha presentado un cargo o es un testigo y usted o su representante nos dice que se hay una actividad protegida por la NLRA en un lugar de trabajo y que es necesario un alivio migratorio para proteger a los empleados que están ejerciendo esos derechos o participando en el proceso de la Junta Nacional de Relaciones del Trabajo (NLRB por sus siglas en inglés), la NLRB considerará la posibilidad de buscar un alivio migratorio para los empleados en ese lugar de trabajo, incluyendo la acción diferida, la libertad condicional, visas U o T u otro alivio en la medida en que esté disponible y sea apropiado. La NLRB no puede proporcionar asesoramiento de inmigración. Si necesita asesoramiento de inmigración, una lista de proveedores de servicios legales sin costo se encuentra disponible aquí (en inglés):
<https://www.justice.gov/eoir/list-pro-bono-legal-service-providers>.

Para más información acerca de la NLRB, por favor visite nuestra página web, www.nlr.gov.